



Waxaan tallo ka sugaynaa ODE ku saabsan ardayda fasalada 12naad ee Dugsiyada Sarre

Gacaliye Waalidiinta Fasalada 12naad ee Dugsiyada Sarre PPS,

Waqtigani ay bulshadeenu ku jirtaa waa mid aan hore inoo soo marin, xaalada caafimaadka dadweynaha ee xanuunka COVID-19 uu sababay dhammaanteen kaasi oo hakad galiyey nolosheenii maalinlaha ahayd. Waxa aan ka warqabnaa isbedelada iyo hakadka jadwalkii iskuuladeena inay ku abuurtay jahawareer, walaac iyo cabsi ardaydeena iyo qoysaska dhammaan dugsiyada degmada. Ardayda ku jirtra fasalka 12naad ee dugsiyada sare, oo ahayd in ay ku jiraan todobaadyadii ugu dambeeyey ee xirfadahoodii Dugsiyada Degmada Portland(PPS), waqtigani waa mid ay ku gadaaman tahay hubaal la'aan.

Waxaan rabnaa in aad ogaataan in si degdeg ah uga rajeyneyno tallooyin aan ka fileyno Waaxda Waxbarashada Gobolka Oreogn (ODE), kuwaasi oo ku saabsan su'aalo ay ka mid yihiin shuruudaha qalin-janinta ardayda fasalada 12naad ee 2020. Marka ugu horeysa ee aan helno tallooyinkaasi waxa aan la wadaagi doonaa ardayda, qoysaska, iyo iskuulada. Xusuusin ahaan, mar kasta wixii macluumaad ugu dambeeyey PPS kuna saabsan COVID-19 ka heli kartaa halkani pps.net/coronavirus.

Sidaasi darteed, macalimiintii waxa ay ka qeybqaadanayaa todobaadkani horumarinta xirfadahooda macalinimo sidii loo bilaabi lahaa barnaamij waxbarashada-masaafada ku salaysan guriga todobaadka soo socda. Jimcaha marka la gaaro waxaan heli doonaa macluumaad dheeraad oo aan idinla wadaagno.

Anigoo ku hadlaya magaca hoggaanka Dugsiyada Degmada Portland, waxaan idin leeyahay waad ku mahadsan tihiin dabacsanaantiina iyo fahamkiina iyada oo aan ka jawaabayno dhibaataada caafimaadka dadweynaha. Waa idinla soo xiriiri doonaa sida ugu degdeg badan ee aan war ka helno ODE.

Daacadnimo,

Luis Valentino
Sarkaalka Madaxa Waxbarashada